SANAD DUGSIYEEDKA 20 ______ - 20 ______

DENVER PRESCHOOL PROGRAM

## Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Denver

# Arjiga Daynta Kharashka Waxbarashada

**Magaca ilmaha** ________________________________________

Waxaa ansixiyay dadkii u codeeyay 2006 oo waxaana dib u cusboonaysiin lagu sameeyay 2014, Barnaamijka Waxbarashada Kahor ee Denver (DPP) waxa uu u suurto geliyay waxbarashada dugsiga kahor ardayda waxbarashada dugsiga kahor ee reer Denver. DPP waxa uu ku maalgeliyay wax ka badan $15 milyan daynta kharashka waxbarashada qoyska iyo $3 milyan oo dheeraad ah khayraadka waxbarashada sanadkii celcelis ahaan 250 dugsiyada waxbarashada dugsiga kahor ah oo magaalada oo dhan ah, oo waxa uu siiyay barnaamijyadan iyada oo loo raacinayo khayraadka ay u baahan yihiin si ay u bixiyaan waxbarasho tayo saraysa.

**Si loogu qalmo dalbashada Daynta Kharashka Waxbarashada DPP waa in aad degan tahay Magaalada iyo Degmada Denver oo ilmahaagu waa inuu gaadhay 3 ama 4 jir wixii ka horeeya Oktoobar 1 sanad dugsiyeedka aad dalbanayso oo uu ku jiraa barnaamij DPP ku jira.** Xadiga Daynta Kharashka Waxbarashada qoysku heleyo waxay ku xidhan tahay xadiga iyo dakhliga qoyska, qiimaynta tayada waxbarashada dugsiga kahor ee ay doorteen, iyo tirada saacadaha todobaadkii ilmuhu dhigto waxbarashada dugsiga kahor. Laakiin, ilmo kasta oo 4 jir ah oo degan Denver oo dhigta waxbarashada dugsiga kahor oo ku jirta DPP waxa uu xaq u leeyahay inuu helo waxoogaa dayn ah. Hadii dugsigaaga bixiya waxbarashada dugsiga kahor uuna weli ku biirin DPP, fadlan ku dhiiri geli inuu nala soo xidhiidho si ay wax uga ogaadaan sida loogu biiro. Marka dugsigaaga bixiya waxbarashada dugsiga kahor uu isku duwaan geliyo inuu ku biiro DPP oo arjigaaga la ansixiyo, waxa aad bilaabi kartaa inaad qaadato Daynta Kharashka Waxbarashada. Wixii qiyaasta bishii ee Daynta Kharashka Waxbarashada ah, fadlan booqo **dpp.org/calculator**.

Marka aad dhamaystirto, fadlan ugu gudbi arjiga iyo waraaqaha (eeg hoos) DPP iimeel ahaan, faakis, ama boos:

**Iimeylka ahaan**
application@dpp.org

**Faakis ahaan**
(303) 295-1750

**Boos ahaan**
Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Denver
P.O. Box 40037 | Denver, CO 80204-0037

**Nuqul onlayn ah oo arjiga ah ayaa sidoo kale la helayaa oo waxaana lagala heleyaa apply.dpp.org isaga oo ku qoran luuqado badan. Marka la ansixiyo, DPP waxay kuusoo diri doontaa warqad celcelis ahaan mudo hal todobaad ah gudihii taas oo kugu wargelinaysa adiga iyo waxbarashada dugsiga kahor xadiga bishii ee Daynta Kharashka Waxbarashada ee ilmahaaga.** Daynta Kharashka Waxbarashada waxaa si toos ah loo siin doonaa waxbarashada dugsiga kahor ee ilmahaaga waxana lagu dabbiqi doonaa biilka kharashkaaga waxbarashada bil kasta. Noo sheeg hadii cinwaankaaga ama dakhligaagu uu is badalo kadib marka aad dalbato.

Hadii aad ka qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan arjigaaga, nidaamka arjiga Daynta Kharashka Waxbarashada ama aad uga baahan tahay kaalmo buuxinta loo baahan yahay ah, **fadlan nalaga soo hadal 303.595.4DPP(4377), iimeel u dir info@dpp.org ama booqo websaytkaayaga dpp.org.**

## Waraaqaha La Gudbinayo

**Fadlan buuxi arjigan oo dhan oo waxa aad keentaa waraaqaha soo socda arjigan. Hadii aad waraaqo ka timaado waxay keeneysaa in dib u dhac ku yimaado arjigaaga. Keenista cadaynta dakhliga aad ayaa loo dhiiri geliyaa si loo baajiyo helitaanka xadiga ugu yar ee kharashka daynta. Hadii wax kamid ah waraaqahan aanad heleynin, fadlan noola soo xidhiidh wixii kaalmo ah. Fadlan sax sanduuqa ku xiga shayada aad bixinayso.

☐ **WAAJIB: XAQIIJINTA DA'DA ILMAHA**
Nuqulka waraaqaha rasmiga ah ee ay la socdaan magaca iyo taariikhda dhalashada ilmuhu. Tusaale ahaan waxaa kamid ah: Shahaadada Dhalashada ilmaha, baasaboor, waraaqo maxkamadeed, duwaanka talaalka, waraaqaha I-94, duwaanka taxliisha gaalada, ama duwaanka isbitaalka. Tiro yar oo caruur ah oo gaadha 3 jir marka la gaadho ama wixii ka horeeya Oktoobar 1 ayaa u qalmi kara inay helaan daynta kharashka waxbarashada DPP, badanaa caruurtu waa inay noqdaan 4 sano jir Oktoobar 1 ama wixii ka horeeya sanad dugsiyeedka aad dalbanayso si aad u hesho lacagta DPP. Kala xidhiidh kooxda ku biirida info@dpp.org ama 303-595-4DPP(4377) hadii aad qabto wax su'aalo ah.

☐ **WAAJIB: XAQIIJINTA CINWAANKA WAKHTIGAN**
Nuqul waraaqaha rasmiga ah oo uu la socdo magacyada mid kamid ah waalidka/masuulka iyo cinwaanka guriga ilmaha. Tusaale ahaan waxaa kamid ah: bayaanka daynta guriga, bayaanka cashuurta guriga, warqada U Ololaynta Dadka Bilaa Guriga, waraaqaha Maamulka Guryaynta, kirada wakhtigan, cadaynta mulkiyada guriga, ama biilka laydhka. Si aad u hesho lacagta DPP ilmahaagu waa inuu degan yahay Magaalada iyo Degmada Denver.

☐ **LA SOOJEEDSHAY: XAQIIJINTA DAKHLIGA HAL BIL**
Shaambada jeega ee bisha ugu danbaysa (hadii la bixiyay wax ka badan hal mar bishii, oo ay ku jiraan dhamaan shaambadaha bisha), bayaanka mushaharka, cashuur celinta ama waraaqaha kale ee dakhliga waalidka/masuulka.
*Ogsoonoow: Xaqiijinta Dakhliga waxaa looga baahan yahay qoysaska haysta 3 sano jir.*

DPP dadka kuma takoorto qoomiyad, dhalasho, xaalada soo galayti, rabitaanka jinsiga, aqoonsiga jinsiga, bandhiga jinsiga, xaalada guurka, xaalada ciidamada iyo laxaad la'aan.

# Qaybta I. Macluumaadka Ilmaha

**Magaca Sharciga Ilmaha oo Sadexan**

Magaca Koowaad ____________________ Magaca Saddexaad ____________________ Magaca Aabaha ____________

**Jinsiga** ☐ Lab ☐ Dheddig ☐ Khaniis ☐ Wax Kale ☐ Qof jinsigiisa beddelay ☐ Doorbidayaa in aanan sheegin

**Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss)** _____/_____/_______

**Taleefanka Kowaad** ______________________________

**Cinwaanka Guriga Ilmaha**

Cinwaanka Jidka/Guriga: ____________________________

____________________________________________

Magaalada, Gobolka, Boosta __________________________

**Cinwaanka Waalidka/Masuulka ee #1**
*(Kaliya hadii uu ka duwan yahay ka ilmaha)*
☐ Waalid ☐ Masuulka *(fadlan dooro mid)*

Cinwaanka Jidka/Guriga: ____________________________

____________________________________________

Magaalada, Gobolka, Boosta __________________________

**Jinsiyada/Qowmiyada Ilmaha**

☐ Hindida Maraykanka/Dhalad Alaska
☐ Madow ama Afrikaan Ameerikaan
☐ Aasiyaan
☐ Dhalad Hawaii ama waxkale
☐ Baasifik Aaylaandar
☐ Cadaan
☐ Aan liiska kujirin - fadlan cayin:

______________________________

**Hispanik/Latino (Haa/Maya)**

☐ Haa
☐ Maya

**Luuqada Kowaad ee Ilmaha**

☐ Ingiriisi
☐ Isbaanish
☐ Fiitnaamiis
☐ Carab
☐ Ruush
☐ Amxaari
☐ Faransiis
☐ Soomaali
☐ Nibaali
☐ Af Shiinaha-Mandarin
☐ Barmiis
☐ Aan liiska kujirin - fadlan cayin:

______________________________

**Luuqada la doorbido ee lagula soo xidhiidho**

☐ Ingiriisi
☐ Isbaanish
☐ Fiitnaamiis
☐ Carab
☐ Ruush
☐ Amxaari
☐ Faransiis
☐ Soomaali
☐ Nibaali
☐ Af Shiinaha-Mandarin
☐ Barmiis
☐ Aan liiska kujirin - fadlan cayin:

______________________________

# Qaybta II. Kaqaybqaadashada Daraasadda Cilmibaarista

**Cidda ay wada shaqeeyaan DPP oo ay la socdaan la taliyeyaasha qiimeynta ayaa qaban doona daraasad cilmi baadhis oo qoto dheer oo sanadle ah oo DPP ah si loo cabiro farqiga ay u sameeyaan dugsiyada waxabarashada kahor caruurta iyo qoysaskooda.**

- Qoysaska waxaa lagu doortaa si nasiib ah.
- Waxaa jira gunnooyin laguu siinayo ka qayb galkaaga.
- Hadii la doorto, ilmahaaga waxaa qiimayn ku samayn doono xirfadle caruurnimada hore ah ilmaha oo jooga waxbarashada dugsiga kahor iyo, mararka qaar, daryta sanad dugsiyeedkooda waxbarashada kahor.
- Waxaa lagaa dalban doonaa inaad bixiso macluumaad ku saabsan ilmahaaga iyo waxa aad kala kulanteen DPP.
- Waxa aad heli kartaa natiijada shaybaadhka ilmahaaga.
- Warbixinta waxaa la iskugu daraa heer kooxeed oo kuma jiri doonto macluumaad sheegaya haybta caruurta gaarka ah.

***Ma doonaysaa in ilmahaaga loo qaado daraasada cilmi baadhista?***

☐ **Haa/Igala soo xidhiidh wixii macluumaad dheeraad ah** ☐ **Maya** Fadlan sax sanduuqa doorashadaada ku xiga.

# Qaybta III. Macluumaadka Waxbarashada Dugsiga Kahor

| **Tirada saacadaha todobaadkii ee ilmahaagu dhiganayo dugsiga** | ☐ **Gelin** (ugu yaraan 5 saacadood todobaadkii) | ☐ **Maalin Dhan** (ugu yaraan 25 saacadood todobaadkii) | ☐ **Maalin Balaadhan** (ugu yaraan 33 saacadood todobaadkii) |
|---|---|---|---|

☐ **Weli maan helin waxbarashada dugsiga kahor oo aan ku daro.** Hadii aanu weli ilmahaagu ku jirin waxbarashada dugsiga kahor fadlan sax sanduuqan oo waxa aad ka boodaa inta kale ee qaybtan. Hadii uu ilmahaagu ku jiro waxbarashada dugsiga kahor, fadlan buuxi macluumaadka dugsiga ee hoose.

**DPP-ga waxbarashada dugsiga kahor ee aad u doorатay ilmahaaga sanad dugsiyeedka** 20_____ - 20_____

Magaca Bixiyaha Waxbarashada Dugsiga Kahor ______________________________________

Cinwaanka Jidka/Guriga ______________________________________________

Magaalada, Gobolka, Boosta ____________________________________________

# Qaybta IV. Macluumaadka Waalidka/Masuulka iyo Dakhliga

☐ **Ma doonayo in aan bixiyo dakhligayga.** (Marka aad taas samayso waxa aad dooranaysaa heerka ugu hooseeya ee kaalmada dhaqaale. Waxaa si wayn la iskugu dhiiri gelinayaa in aad bixiso macluumaadka dakhligaaga si aad u hesho xadiga ugu badan ee daynta kharashka waxbarshada ee ilmahaagu u qalmo.)

☐ **Waxa aan doonayaa in aan bixiyo waraaqaha wadarta dakhliga qoyskayga oo waxaan raaciyay waraaqaha cadaynta ah.** (Macluumaadka hoose waa waajib.)

**Dakhliga Isku Gaynta Bishii ee Qoyska**

Fadlan ku buuxi qaybaha hoose macluumaadka dakhliga shaqada iyo ka aan shaqada laga helin ee **dhamaan waalidka/masuulada ee qoyska ilmaha** oo waxa aad ku lifaaqdaan waraaqaha dhamaan dakhliga. **Waraaqaha la ogol yahay waxa ay ku qoran yihiin xaga hore ee arjigan. Macluumaadku waa inuu noqdaa wadarta bishii.**

- Dakhliga shaqada oo uu ku jiro mushaharka/dakhliga/bakhshiishka ama dakhliga qofka iskii u shaqaysta..
- Dakhliga aan shaqada ka iman waxa ku jira dakhliga TANF, biilka caruurta/biilintooda waalidka kale, dakhliga dhaxalka, iwm.
- Hadii aad iskaa u shaqaysato ama aanad haynin cadayn dakhliga ah, **waa inaad buuxisaa qoraalka dhaarta ah ee dakhliga adiga oo la xidhiidhaya 303.595.4DPP(4377).** (Ku liis garee dhamaan dakhliga wixii aan shaqo ahayn halka hoose)

**WAALIDKA/MASUULKA LAMBAR 1**

Magaca Koowaad ______________________ Magaca Saddexaad ______________________

Taleefonka Koowaad: ______________________ Taleefanka Labaad: ______________________

Miyay DPP kuu soo diri kartaa fariimo qoraal ah?
☐ Haa ☐ Maya

Iimeel ______________________

**Waalidka/Masuulka lambar 1 | Wadarta Dakhliga Bishii**
Dhamaan Shaqada (Wadarta Dakhliga/Mushaharka/Gunada/Bakhshiishka ee bishii) iyo Aan Shaqo Laga Helin (TANF/Masruufka Ilmaha/Dakhliga Dhaxalka/iwm.) Dakhliga ▸ [ ]

**WAALIDKA/MASUULKA LAMBAR 2**

Magaca Koowaad ______________________ Magaca Saddexaad ______________________

Taleefonka Koowaad: ______________________ Taleefanka Labaad: ______________________

Miyay DPP kuu soo diri kartaa fariimo qoraal ah?
☐ Haa ☐ Maya

Iimeel ______________________

**Waalidka/Masuulka lambar 2 | Wadarta Dakhliga Bishii**
Dhamaan Shaqada (Wadarta Dakhliga/Mushaharka/Gunada/Bakhshiishka ee bishii) iyo Aan Shaqo Laga Helin (TANF/Masruufka Ilmaha/Dakhliga Dhaxalka/iwm.) Dakhliga ▸ [ ]

***Wadarta Dakhliga Guud ee Bishii ee Qoyska***
**Dhamaan Waalidiinta/Masuulada Qoyska Ilmaha ee Ku Qoran Kor** ▸ [ ]

*Waraaqaha la ogol yahay: shaambada jeega ee bisha ugu danbaysa (hadii la bixiyay wax ka badan hal mar bishii, oo ay ku jiraan dhamaan shaambadaha bisha), bayaanka mushaharka, cashuur celinta ama waraaqaha kale ee dakhliga waalidka/masuulka.*

***Fadlan dooro wadarta tirada dadka qoyskaaga ah, ee degan gurigaaga (oo isku dara adiga iyo ilmahaagu)***

***2 3 4 5 6 7 8 9 10+*** (fadlan sheeg tirada): __________

DENVER PRESCHOOL PROGRAM

# Qaybta V. Noo Sheeg Sida Aad Noo Ogaatay

**Dooro dhamaan qaababka aad bulshada uga maqashaday DPP.** Fadlan sax sanduuqa doorashooyinkaaga ku xiga.

- ☐ Carwooyinka ama dabaal daga bulshada
- ☐ Agabka suuqgaynta DPP (booskaadh, waraaqaha xayaysiiska)
- ☐ Saaxiib ama xubin qoys* *Fadlan noo sheeg magaca saaxiibka ama xubinta qoyskaaga ee kuu soo sheegtay oo waxa aanu u diri doonaa kaadh hadyad ah oo mahadnaq ah

  Magaca: ______________________

  Taleefan ama Iimeel: ______________________
- ☐ Bandhiga bulshada DPP
- ☐ Shaqaalaha ku sugan dugsiga waxbarashada kahor ee ilmahaaga
- ☐ Baadhitaanka online-ka ah
- ☐ Xayaysiis onlayn ama daabacan
- ☐ Reedyaw
- ☐ Baraha Bulshada
- ☐ Wax kale: ______________________

# Qaybta VI. Heshiiska & Fasaxa Macluumaadka ee Waalidka

***Waalidka/masuulka waxaa looga baahan yahay inuu akhriyo oo uu saxeexo hoos:***

Heshiiskan waxaa wada galay DPP iyo waalidka ama masuulka ("Waalidka") hoos lagu sheegey magiciisa sida uu dhigayo arjiga uu buuxiyay waalidka/masuulku ______/______/______**(Taariikhda).** Kuwa soo socdaa waa shuruudaha aas aasiga ah ee Heshiiska:

- Ka iibin ama kirayn mayno macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed cid kale si ay u isticmaasho iyada oo aan ogolaanshe lagaa helin. Waxa aanu laakiin u isticmaali karnaa macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed wixii ujeedo ah ee Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Denver ah.
- Waalidku waxay fahmaan muhiimada in ilmuhu uu qabto dugsiga mar kasta oo ay shaqaynayso waxbarashada dugsiga kahor oo waxa uu ogolaaday inuu wargeliyo bixiyaha hadii ilmuhu uu maqnaanayo iyo sababta uu u maqnaanayo hadii ay ku haboon tahay.
- Waxaa weeye masuuliyad saaran Waalidka inuu u hogaansamo shuruucda iyo qawaaniinta bixiyaha iyo DPP, oo waxaa kamid ah kuwa la xidhiidha ka maqnaanshaha.
- Waalidku waxa uu fahmay in lagu go'aamiyo Daynta Kharashka Waxbarashada si waafaqsan qaacidada ay ansixisay DPP taas oo ku xidhan xajmiga iyo dakhliga qoyska, qiimaynta tayada ee dugsiga waxbarashada kahor ee la doortay, iyo tirada saacadaha todobaadkii ee ilmahaagu uu qabto waxbarashada dugsiga kahor - oo waxay ku xidhan tahay xadiga deeqda sanadkii ee DPP ee Magaalada iyo Degmada Denver.
- Arday lasoo xulay, DPP waxay ku siisaa deeq dheeraad ah oo ka baxsan Daynta Kharashka Waxbarashadda DPP Deeqda Waxbarashada DPP. Waxa si toos ah kuula soo socodsiin doona Kooxdayada Ku Biiridda hadii aad u qalanto deeqdan.
  - Waalidku waxa uu fahmay in u qalanka Deeqda DPP lagu go'aamiyo dakhliga waalidka/masuulka, xajmiga qoyska iyo tirada saacadaha todobaadkii ee ilmuhu uu tago waxbarashada dugsiga kahor, oo waxaa kaliya heli kara dadka aan qaadan CPP ama deeqda Head Start ee ku jira dugsi goob bulsho.
  - Waalidku waxay fahmeen in hadii xaalada qoysku ay is badasho oo aanu ilmuhu wixii intaa ka danbeeya aanu u qalmin Deeqda Waxbarashada waxay isla markaba ogaysiinayaan DPP.
  - Lacagta Deeqda DPP iyo helitaankeedu waxay ku xidhan tahay ogolaanshaha Gudida Maamulka DPP. Bixinta deeqda waxbarasho wakhti kasta waxaa lagu samayn karaa dib u habayn inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedka xaalado badan dartood, oo waxaa kamid ah laakiin kuma koobna helitaanka deeqda, awooda ku biirida ama isbadalada shuruudaha u qalanka waxbarashada dugsiga kahor ama qoyska.
- Waalidku waxa uu fahmay in DPP ay meesha ka saari karto Daynta Kharashka Waxbarasho iyo/ama lacagta Deeqda Waxbarasho ee DPP hadii Waalidka, ilmaha ama bixiyuhu uu u hogaansami waayo shuruucda iyo qawaaniinta DPP.

Hadii Waalidku uu ka qabo su'aalo Daynta Kharashka Waxbarashada ama wixii kale ee mushkilad ah ee la xidhiidha heshiiskan, Waalidku waa inuu kala xidhiidhaa DPP **303.595.4DPP(4377)** ama **info@dpp.org**, ama booqo **dpp.org**.

Waxa aan u ogolaaday Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Denver (DPP) inay u siiso wixii macluumaad ah ee Arjigayga hay'adaha ay wada shaqeeyaan DPP oo ay ku jirto Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha Colorado, Waaxda Denver ee Adeegyada Bilaa Aadanka, Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Colorado (CPP), Head Start, iyo Dugsiga Shacabka Denver wixii ah ujeedo haynta duwaanada, qiimaynta iyo hanti dhawrka barnaamijka. Waxa aan ka dhaafay DPP dhamaan khasaaraha ka yimaada bixinta, qiimaynta ama nuqul ka samaynta macluumaadkaas. DPP waxay u baahan kartaa macluumaad kale hadii uu jiro hanti dhawr.

**Waxa aan bayaaminayaa in macluumaadka aan sheegey uu yahay run, sax oo uu dhamaystiran yahay. Waxa aan ogolaaday in aan bixiyo, hadii la iga dalbado, wixii waraaqaha loo baahan yahay ah si aan u xoojiyo macluumaadka laga warbixiyay.**

| | |
|---|---|
| **Magaca Daabacan ee Waalidka/Masuulka** | **Magaca Daabacan ee Diyaariyaha (Hadii uu ka duwan yahay ka waalidka ama masuulka)** |
| **Saxeexa Waalidka/Masuulka (*Waajib)** | ***Saxeexa Diyaariyaha (Hadii uu ka duwan yahay ka waalidka ama masuulka)** |
| **Taariikhda (bb/mm/ssss)** | **Taariikhda (bb/mm/ssss)** |

**Saxeexida Arjigan iyada oo aad ku qorayso magacaaga iyo inaad horseedo in Arjigan la gaadhsiiyo Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Denver waxa uu qayb ka noqon doonaa saxeexaaga waxana aad ku xaqiijin doontaa in aad tahay shakhsiga saxeexaya Arjigan ee keeneya in la gaadhsiiyo Barnaamijka Waxbarashada Dugsiga Kahor ee Denver oo waxa aad qiraysaa in macluumaadka ku jira Arjigan uu yahay run, sax oo uu dhamaystiran yahay.*

***U Gudbi:*** ☐ **Buuxi Foomkan** ☐ **U Gudbi Dhamaan Waraaqaha Loo Baahan Yahay** ☐ **Iimeel, Faakis ama Boos Foomka & Waraaqaha DPP**



P.O. Box 40037 Denver, CO 80204-0037 | 303.595.4DPP | 303.295.1750 | info@dpp.org | dpp.org